



Kasbashada Dibloomada Dugsiga Sare ee Ohio.

Fasalka 2020

Maadaama aad tahay arday galay fasalka 9aad intii u dhaxaysay Julaay 1, 2016, iyo Juun 30, 2017, waxaad leedahay dhabbooyin badan oo aad ku kasban karto dibloomada dugsiga sare si aad ugu gudbi karto tallaabooyinka xiga ee waxbarashada ama shaqada.

- Waa inaad dhammaystirtaa oo aad kasbataa ugu yaraan 20 dhibcood maaddooyin cayiman. Sidoo kale, waa inaad hesho cashar dhaqaalaha iyo maaliyadda oo aad dhammaystirto ugu yaraan laba simistar oo ah farshaxanka waajib ah. Degmadaadu waxa dhici karta inay leedahay shuruudo qalinjabin oo dheeraad ah. La-taliyaha dugsigu ayaa haya macluumaadkan.
- Waa inaad muujiso wixii aad baratay. Waxa jira saddex sharciga Ohio.

1. Imtixaanada Gobolka Ohio

Inaad hesho 18 kamid ah 35 dhibcood toddoba ah imtixaanada gobolka ee dhammaadka koorsada. Waxaad kasban kartaa ilaa shan dhibcood imtixaan kasta. Waxaad u baahan tahay ugu yaraan afar dhibcood xisaabta, afar dhibcood farshaxanka luuqadda Ingiriisida iyo lix dhibcood sayniska iyo cilmiga bulshada.

2. Shahaado suuqa laga aqoonsan yahay iyo buundada imtixaanka diyaar u ahaanshaha shaqada

Kasbo shahaado laga aqoonsan yahay ama koox shahaadooyin ah oo isku ah tiro ahaan 12 dhibcood oo kasbo buundada loo baahan yahay imtixaanka WorkKeys. Ohio lacag ayay kugu siinaysaa inaad imtixaanka halmar gasho. Degmooyinka qaar waxay bixiyaan barnaamijka Senior Only kaasi oo aad ku kasban karto shahaadooyin hal sanad dugsiyeed.


3. Imtixaanka diyaar u ahaanshaha kuuliyadda iyo shaqada

Hel buundo aan u baahnayn hagaajin* xisaabta iyo farshaxanka luuqadda Ingiriisida ee ACT ama SAT. Degmadaadu waxay dooran kartaa ACT ama SAT. Waxaad gali doontaa imtixaan hal wakhti ah, gobolka oo dhan ah, gu'ga ah fasalka 11aad si bilaash ah.

*Guddoomiyayaasha jaamicadda Ohio ayaa dejiyay buundooyinkan, kuwaasi oo la beddeli karo.

- Haddii aanad buuxin wax kamid ah dhabbooyinka saddexda ah ee sare, sharciga Ohio wuxuu ku siinayaa laba fursadood oo kale si aad u kasbato dibloomada dugsiga sare. Dhinaca kale ee xaashidan xaqiiqda ayaa sharxaysa iyaga.

Ka raadi wax badan oo kusaabsan qalinjabinaya halkan education.ohio.gov/graduation oo hel qaybta fasalkaaga qalinjabinaya



La hadal la-taliyaha dugsigaaga xilli hore sanad dugsiyeedka oo kala hadal dhabbahaaga qalinjabinaya iyo guushaada mustaqbalka.

Ikhtiyaaro Qalinjabin oo Dheeraad ah ayaa loo Heli karaa Fasalka 2020

Ardayda gashay fasalka 9aad kadib Julaay 1, 2014, waa kuwa ugu horreeya ee ku kasban doona dibloomada shuruudaha qalinjabin ee cusub. Marka laga tago buuxinta shuruudaha manhajka dugsiga sare, ardayda Ohio waa inay buuxiyaan mid kamid ah [saddexda dhabbo ee jira si ay u](#) kasbadaan dibloomada dugsiga sare.

Si uu u taageero u gudbista shuruudaha cusub, General Assembly wuxuu ansixiyey ikhtiyaaro qalinjabin oo kumeel gaadh ah oo loogu talagalay ardayda fasalka 2018. **Sharci dhawaan ah ayaa ku kordhiyey ikhtiyaaro dheeraad ah qalinjabin fasalada 2019 iyo 2020, sida hoos ku qoran.**

Fadlan ogow, sharciga goboku wuxuu wax ka beddelay shuruudaha fasalka 2020 mana ah dhammaan shuruudaha hore qaar looga baahan yahay ardayda fasalka 2020.

Waaxdu waxay rajaynaysaa ardayda intooda badan inay buuxin doonaan mid kamid ah saddex dhabbo ee jira, oo degmooyinkuna waa inay sii waddo inay kala shaqeeyaan ardayda, markii ay munaasab tahay, inay buuxiyaan shuruudaha. Ikhtiyaaradan waxay fursad siinayaan ardayda kuwaasi oon haddii kale buuxiyeen mid kamid ah saddex dhabbo ee jira inay qalinjabiyaan si ay u kasbadaan diblooma.

Labada ikhtiyaar ee qalinjabin ee dheeraad ah ee fasalka 2020 waa:

Ikhtiyaarka 1

Ardayda galaysa fasalka 9aad inta u dhaxaysa Julaay 1, 2016, iyo Juun 30, 2017, waxay mutaysteen inay isticmaalaan ikhtiyaarada qalinjabin ee wax laga beddelay ee hoose.

Ardaydu waa inay gasho oo ay gudubto koorsooyinka wax ka qabanaya shuruudaha manhajka oo galaan imtixaanada toddobada ah ee dhammaadka koorso. Haddii ardaygu helo buundada "1" ama "2" imtixaanka xisaabta iyo farshaxanka luuqadda Ingiriisida, waa inuu ardaygu dib u galo imtixaanka ugu yaraan halmar.


- Sidoo kale, waa inaad buuxiso [ugu yaraan laba](#) shuruudaha hoose ah: Kasbadaa GPA ah 2.5 kamid ah 4.0 dhammaan koorsooyinka uu **dhammaystay fasalada 11aad iyo 12aad** (waa inuu dhammaystirtaa ugu yaraan afar sano oo buuxa- ama wax u dhigma- oo koorsooyin ah sanad kasta);
- Buuxiyaa buug la qorayo fasalka 12aad kaasi oo buuxinaya shuruudaha ay dhigtay tilmaamaha iyo Waxbarashada ee Waaxda Ohio iyo hannaanka qiimaynta (**tilmaamaha waxa la heli karaa Meey 31, 2019**);
- Inta lagu jiro fasalka 12aad, dhammaystiro shaqo ama adeeg bulsho oo dhan 120 saacadood, sida sheegtay Waaxda Ohio ee Waxbarashada iyo Xafiiska Badhasaabka ee Workforce Transformation (**tilmaamaha waxa la heli karaa Meey 31, 2019**);
- Kasbo saddex ama ka badan [buundooyinka College Credit Plus](#) wakhti uun inta aad kujirto dugsiga sare;
- Kasbo buundo koorso Advanced Placement (AP) ama International Baccalaureate (IB) oo kasbo imtixaanka AP buundo ah 3 ama ka badan ama buundada imtixaanka IB 4 ama ka badan wakhti kasta inta dugsiga sare aad kujirto;
- Kasbo buundada imtixaanka WorkKeys oo ah 3 mid kasta saddexda qaybood ee imtixaanka;
- Kasbo shahaadada ama shahaadooyinka Guddida Gobolku ansixisay [suuq aqoonsan yahay](#) taasi oo la mid ah ugu yaraan saddex dhibcood;
- [Buuxi Shuruudaha OhioMeansJobs Readiness Seexataa](#).

SU'AALO?

Haddii aad qabto su'aalo kusaabsan shuruudaha qalinjabin, wac (614) 466-1317 ama iimeyl u dir gradrequirements@education.ohio.gov.

Ikhtiyaarka 2

- Ardaydu waa inay gasho oo ay gudubto koorsooyinka wax ka qabanaya shuruudaha manhajka oo galaan imtixaanada toddobada ah ee dhammaadka koorso. Ardaydu waa inay dhammeeyaan barnaamij shaqada-farsamada ah oo ay kujirto ugu yaraan afar koorso hal dhabbo shaqo oo kaliya oo dhammaystiraan [ugu yaraan mid](#) ikhtiyaarada hoose ah:: Kasbadaan buundo guud ah oo ah Aqoon leh ama ka sii fiican taasi oo kusalaysan dhammaan imtixaanada shaqada-farsamada ama casharada imtixaanka;
- Kasbadaan shahaado ama shahaadooyin suuq aqoonsan yahay taasi oo la mid ah 12 dhibcood;
- Dhammaystiraan waayo-aragnimo shaqo oo dhan 250 saacadood oo leh caddayn qiimaynta togan.



La hadal la-taliyaha dugsigaaga xilli hore sanad dugsiiyeedka oo kala hadal dhabbahaaga qalinjabin iyo guushaada mustaqbalka.